



Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya

Baarlamaanka Federalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 5-aad

Documentigakalfadhiga 5-aad kulankiisa:11-aad

Kalfadhiga 5-aad

Tr:24/11/2014

Kulankiisa :11-aad, sacada furitanka.11:46 gh, sacada xiritanka.12:00 gd.

Guntinta:

Ajendaha:

- 1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
- 2.Ansixinta Ajendaha**
- 3.Qeybinta Mooshinka Kalsooni kala Noqoshada Xukuumadda**

Shir-Guddoomiye,Guddoomiyaha Baarlamaanka Federalka Soomaaliya

Mudane:Muxammad Sheekh Cusmaan Jawari.

Waxaa shirka furey Guddoomiyaha Baarlamaanka Federalka Soomaaliya Mudane: Muxammad Sheekh Cusmaan Jawari.

Guddoomiyaha wuxuu xildhibaanada weydistey in ay Ajendaha Ansixiyan weyna Ansixiyan. Intaaka dib waxaa mar qur'a hoolka shirka lagu qabanayay kazoo yeray sawaxan iyo buuq, Guddoomiyaha wuxuu xildhibaanada u soojeediyay, in ay ilaaliyan sharciga, nidaamka iyo xasiloona, Guddoomiyaha Baarlamaanka wuxuu u soojeediyay Xildhibaanada, in ay fariistan si aan u wada hadalno hadii la wadahadlo xalbaa imanayo, waayo hadii aad buuqdan cidna ismaqlimayso, arintaasna weydiideen xildhibaanada.

Intaaka dib Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane: Muxammad Sheekh Cusmaan wuxuu soo jeediyay, in xildhibaanada loo qeybiyay Mooshin, kusaabsan kalsooni kala noqoshada Xukuumadda Tr:24/11/2014, inay soo Akhristan muddo 5maalmood ah, kadibna ay bilaabaneyso kadoodis.

Guddoomiyaha Golaha Baarlamaanka, wuxuu sheegey, Mooshinka ka doodista nuxurkiisa, waxay Golaha kafurmeysaa maalinta Axada ooku began 30/11/2014.

Intaaka dib Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxuu sheegey in maalinta Axada uushirjiro.

Shir Guddoomiye, Guddoomiyaha Baarlamaanka Federalka Soomaaliya

Mudane: Muxammad Sheekh Cusmaan Jawari, uushir Guddoominayay kalfadhiga 5-aad kulankiisa: 11-aad, uusheegey in uu shirkaxiran yahay sacada markey ahayd 12:00 gd.